Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

K-2

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Ku martiqaad ilmahaaga inuu sameeyo liis ay ku qoran yihiin waxa aad qabato maalin kasta. Dheh jumlada ka dib weydii ilmahaaga inuu dib kuugu sheego (tusaale ahaan, “Marka hore waxaan cunnaa quraac.”).
- Ku kalaytama qorista shay kasta oo liiskaaga ku jira. Waxaad ku dari kartaa jumlad bilaawayaal sida marka hore anaga_____ , ka dibna anaga_____ , marka xigta anaga_____.

Qorshaha shaqada guriga

- Qor qaabaynta jumlada (tusaale ahaan, "Maanta waxaan aadnay___). Si wadajir ah u dheh jumlada oo ay ku jirto kelmadda maqan (tusaale ahaan, "beerta"). Kadibna waydii canugaada inuu mar labaad dib u dhaho jumlada oo dhan ("Maanta waxaan aadnay beerta.").
- Weydii canugaada inuu qoro ereyga (tusaale ahaan, "beerta") adigoosi wadajir ah u aqoonsanayo dhawaaq kasta oo kalmada ku jira. Kadibna ku qor xarafka dhawaaq kasta meelaha bannaan.

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Ku qor ereyadan "Tani waa warqad ama sabuurad cad. Ku kalaytama inaad ku sharaxdan waxaad cunaysan (tusaale ahaan, "Tani waa kulayl.").
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu buuxiyo kelmadda maqan (tusaale ahaan, kulayl, qabow, milix leh) adigoo si wadajir ah iskula aqoonsanayo dhawaaqyada. Waxa jira dhawaaqyo laga yaabo inaad hesho si aad uga caawiso ilmahaaga inuu garto marka uu wax qorayo.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Ku buuxi saxan ama weel ciid, bur, kareemka xiirashada, ama wax kasta oo kale oo loo isticmaali karo in lagu sameeyo qaab.
- Ilmahaaga u sheeg xaraf ama kelmad (tusaale ahaan, madadaalo, ciyaar) oo ha ku qoraan ciidda, burka ama kareemka xiirashada fartooda.

Qorshaha banaanka

- La imow qalin iyo warqad marka ilmahaagu dibaddakuciyaarayo.
- Kacodso canugaada inuuabuuro sheeko madadaalo leh oo ku saabsan waxyaabaha/dadka ilmahaagu ku arko bannaanka. Dooro jilaa (tusaale: ey), goob (tusaale: daaradda dambe/beerta) iyo dhibaato (tusaale: eygu wuu ciyaaya). Bixi jumlad bilaawe: "Hadda ka hor waxaa jiri jiray eey _____ ."

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Sheeg magaca meelaha caanka ah ee aad aragto markaad baabuur wadato (tusaale ahaan, dukaamada, makhaayadaha, jardiinooyinka).
- Weydii canugaada in uu soo saaro dhawaaqyada iyo xarfahauu ka kooban yahay ereyga (tusaaleahaan, Chic-fil-A) adiga oo si wadajir ah u sheegaya dhawaaqyada ereyga oo weydii canugaada in uu arko haddii ay samayn karaan gacmahooda xarafka la xiriira dhawaaqaas iyo in kale.

Wakhti walba!

- Qor weedho uu ilmahaagu ku raaxaysan doono inuu kula buuxiyo (tusaale ahaan, "Cuntada aan ugu jeclahay waa___ .")
- Ku kalaytama inaad si oraadh ah ku buuxisaan meelaha bannaan (tusaale ahaan, "Spaghetti”). Dheh jumlada oo dhan oo ilmahaagu ha garto dhawaaqyada kelmada ku jiro. Kula kalaytan ilmahaaga qorista kelmadaha.

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su’aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

ALLOhio

Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

K-2

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- La qor ilmahaaga tilmaamo ku saabsan sida loo dhammaystiro mid ka mid ah hawlaha aad qabato subax kasta (tusaale ahaan, Sidee ayaan u cadaynaa ilkaheena?). Kadibna si wadajir ah u akhriya tilmaamaha.
- Kala hadal ilmahaaga haddii waxa aad qortay ay yihiin sheeko ama tilmaamo iyo sababta.

Qorshaha shaqada guriga

- Ma jiraabuug uu ilmahaagu jecel yahay akhriskiisa? Ha qoraansheeko la mid ah buugga ay jecel yihiin oo ku qoran afkaaga hooyo.
- Kahor inta aadan qorinsamee go'aamo la xiriira sheekada. Yay tahay cidda jilayaasha noqon doona? Xagee sheekadu ka dhici doontaa? Waa maxay dhibaatada ay la kulmi doonaan. Sheekadu waxay leedahay bilow, qayb dhexe iyo dhammaad.

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Maanta ilmahaaga ka qaybgeli cunto karinta. U ogolow inay qoraan liiska maaddooyinka iyo tallaabooyinka aad raacayso markaad wax karinayso.
- Ka caawi iyaga adigoo hadal ahaan ugu sheegaya tallaabo kasta. Waxaa laga yaabaa inaadka hadasho in kuwani yihiin tilmaamo sababtoo ah waxay ku siinayaan hagitaan tallaabo ka tallaabo ah oo leh tilmaamo faahfaahsan oo ku saabsan waxaad samaynayso iyo waxaad u baahantahay inaad samayso.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Dooro ciyaar guriyeed si aad si wadajir ah ugu ciyaartaan.
- Si wada jir ah dib u eegis ugu wada sameeya sharciyada adiga oo akhrinaya tilmaamaha ciyaarta. Waxaad sidoo kale samayn kartaa ciyaaro waxaadna abuuri kartaa sharciyo qoraal ah oo adiga kuu gaar ah una akhrin kartaan si wadajir ah.

Qorshaha banaanka

- Soo hel calaamadaha ku yaalo aagga agagaarka bannaanka sidajardiinooyinka ama barkadaha kuwaas oo leh xeerar.Si wadajir ah u akhriya xeerarka.
- Ka wada hadla sababta sharciyadani ay muhiim u yihiin (tusaale ahaan, waxay bixinayaan tilmaamo gaar ah oo ah waxa aanu baahanahay inaan samayno si aan u badqabno).

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Markaad gaari wadato, u oggolow ilmahaagu inuu ku siiyo tilmaamo ku saabsan meesha aad aadayso, ka leexashada iyo meelahaaad arki doonto inta aad ku sii socoto jidka dugsiga ama guriga.
- Haddii aysan wali garaneyn dariiqa, u oggolow inay isticmaalaan GPS-ka. Ka caawi adigoo weydiinaya su'aalo ay ka mid yihiin: Halkee ayaan u leexdaa? bidix ama midig? Muddo intee le'eg ayay qaadanaysaa?

Wakhti walba!

- Akhri sida- buugaagta (tusaale ahaan, sida loo sameeyo diyaaradaha waraaqada ah), buugaagta sheekooyinka, iyo buugaagta macluumaadka ay kujiraan.
- U oggolow ilmahaagu inay samaystaan sida loo buug, buug sheeko ama buug macluumaad ee gaarkooda ah. Bixi jumlad bilaawayaal sida: aynu qorno buug sida- oo ku saabsan sida wanaagsan ee loo xanaaneeyo xayawaanka rabaayada ah.

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

K-2

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Qor erayada aad isticmaasho inta lagu guda jiro daryeelka maalinlaha ah ee kala duwan ee jadwal hawleedka (tusaale ahaan, ereyadajikada, erayada musqusha, iyo erayada qolkajiifka).
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu kala sooco erayada.u kala qaybiyo qaybaha (tusaale ahaan, burushka cadayga, daawada cadayga, iyo marada tirtirashada waxay noqonayaan ereyada musqusha halka saxanka, foornada iyo galaaska ay noqonayaanereyada jikada).

Qorshaha shaqada guriga

- Ku qor erayada (tusaale ahaan,qalin, warqad, qalinqori) af-Ingiriis iyo luqadaada hooyo xasuus-qoraha dhejinta oo miiska saar. Wada akhri ereyadamid kasta oo ka mid ah.
- Weydii ilmahaaga inuu isticmaalo xasuus-qoraha dhejinta si uu u qoro jumlado dhammaystiran asigoo isticmaalaya erayada (tusaale ahaan, waan jeclahaydugsiga, waan soo kacay).

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Sii ilmahaaga tilmaamo ku aadan ereyo qayb ka ah cuntadaada (tusaale ahaan, "Maxaad u isticmaashaa inaad ku cabto caanahaaga oo ka bilaabma "dhawaaqa c" (samee dhawaaqa)oo ku dhammaada "dhawaaqa p" (samee dhawaaqa)?").
- Ku martiqaad ilmahaaga inay ka jawaabaan su'aashaada oo ay qoraan jawaabahooda. Waxay dooran karaan sida ay ereyga u qoraan (tusaale ahaan, warqad, iyagoo gacmahooda, ay hawada ku jiraan).

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Ku sawir xarfaha hawada ee erayada (tusaale ahaan, sawir,samee, ku dheji, qalin) oo aad ogtahay in ilmahaagu yaqaano.
- Ku martiqaad ilmahaaga inay qoraan ama sameeyaan xarfahaaad hawada ku samaynayso iyagoo isticmaalaya alaabta ay ku ciyaaraan (tusaale ahaan, dhagxaha), jirkooda, ama qoraal ahaan. Wada akhri erayadaoo dhan.

Qorshaha banaanka

- Ku qor 5-10 kelmadood (tusaale ahaan, baaskiil, kubbad, wiifow) marshabiyoodka adigoo isticmaalaya tamaashiir. Akhri kelmad aad ogtahay in ilmahaagu uu yaqaano.
- Weydii canugaada inuu boodo, ku tunto ama ku ordo ereyga aad akhriday. Eeg haddii ilmahaagu heli karo dhammaan ereyada.

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Kahor inta aadan wadin gaariga ama raacin baska, diyaari liis ka kooban 3-5 kelmadood (tusaale ahaan, baabuur, dheereeya, waddo) kuwaas oo ka bilaabma xarfo kala duwan oo lagu kala firdhiyo alifbeetada oo dhan.
- Waydii ilmahaaga inay u qori karaan erayada siday ugu kala horreeyaan ABC.

Wakhti walba!

- Ku kalaytama adiga iyo canugaada adinkoo dhahaayo kelmad (tusaale ahaan, bood,kalluun, sacab). Feer samee si aad u taabato dhawaaq kasta oo aad ereyga ka maqashid (tusaale ahaan, sacabku wuxuu noqoni cl, a, p) ka dibna si degdeg ah u wada dheh.
- Si wada jir ah u sameeyo jumlado nacasnimo ah (tusaale ahaan, libaax badeedu waxay u sacbinayeen dhagaystayaasha) oo ku saabsan kelmadda oo ku kalaytama qorista jumlado qosol leh.

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

Qorshaha qoyska ee akhris–qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

K-2

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Fiiri waxa aad isticmaalayso inta lagu jiro hawl maalmeedkaaga oo ay ku jiraan ereyo qoran (tusaale ahaan, maaddooyinka quraacda, daawada cadayga, saabuunta).
- Tilmaan erayadan oo kula dhawaaq ilmahaaga. Ka wada hadla sida markaad dhawaaqyadaas isku geyso si aad erayo u samayso.

Qorshaha shaqada guriga

- Samee buug xarfo ah oo la isku geeyo si loo sameeyo hal dhawaaq (tusaale ahaan, th, ch, sh). Bog kastaa waa inuu diiradda saaraa mid ka mid ah dhawaaqyada oo uu ku daraa ereyo dhawaaqaas leh (tusaale ahaan, shake, shin, ship).
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu qoro erayo oo sawiro sawirro la xiriira dhawaaqa (tusaale ahaan, bogga “sh” waxa laga yaabaa inuu qoro ship, shop, sheep).

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Dooro ereyada la xiriira waxa aad cunayso (tusaale ahaan, caano, ukumo, hotdog, jibsi) iyo waxa aad samaynayso (tusaaleahaan, cabista, cunista), iyo sida ay arrimuhu u dhadhamayaan (tusaale ahaan, macaan, milix leh). Ku dhawaaq ereyada.
- Ilmahaagu ha higaadiyo erayadaas. Kala hadal sidaad ugu tiraahdo luqadaada hooyo.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Isticmaal kaararka tusmada si aad u qorto laba qaybood oo xarfo ah oo isku dhafan kuwaaso sameeya hal dhawaaq (tusaale ahaan, ch, th, sh).
- Samee "kaararka" Markaad hesho lammaane (tusaale ahaan, sh iyo sh), kaararka dhulka dhig oo dheh dhawaaqa. Si aad iswaafaq u heshid weydii ilmahaaga haddii ay haystaan kaar samaynayo dhawaaqa (th, ch, she, iwm). Haddii ay haa tahay, sii kaarka. Ku kalaytama ilaa aad ka isticmaasho dhammaan kaararka.

Qorshaha banaanka

- Samee calaamado matalaya xarfaha isku dhafka ah kuwaas oo sameeya hal dhawaaq (ch, sh, th).
- Kula kalaytan ilmahaaga adigoo kor u qabanayo calaamada, oo arag waxa aad ku samayn karto jirkaaga ookakooban dhawaaqaas (tusaale ahaan, chop, chirp, shake, think).

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Dib u eeg xarfaha isku dhafka ah ee sameeya hal dhawaaq (tusaale ahaan, sh, ch, th).
- Weydii ilmahaaga inuu hareeraha eego oo uu helo ereyo(tusaale ahaan, shop, shell, shore) oo ay dhawaaqyadaas ugu jiraan bilowga, dhexda ama dhammaadka ereyga. Kala hadal macnaha erayadaas.

Wakhti walba!

- Weydii canugaada inuu warqad u qoro penpal. Qofkani wuxuunoqon karaa saaxiib ka guuray dugsiyada, ilmo-adeer ku nool magaalo ama waddan kale, ama awoowgood/ayaydood.
- Ka caawi qaabaynta jumlada sida: Gacaliye(so) _____ . Waad ku mahadsan tahay_____. Waxaan jeclaan lahaa inaan_____. Waxaan_____. rajaynaa .

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su’aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____

Qorshaha qoyska ee akhris-qoraalka

Ilmahaaga ku taageer barashada luuqada iyo akhris-qoraalka 5 daqiiqo oo kaliya maalintii adigoo isticmaalaya jadwaladaan la soo jeediyay. Isticmaal sanduuqa fikrad-celinta si aan u ogaano sida ey u dhacday iyo wixii aad ka baratay ilmahaaga.

K-2

Calaamada ku hoos taalo qorsha walba waxey tuseysaa:

- Ingiriis isticmaal
- Luuqadaada hooyo isticmaal
- Isticmaal Ingiriiska iyo Luuqadaada hooyo

Tell us how we did!

Qorshaha maalinlaha

- Qaado sawirro ama ilmahaagu ha sameeyo sawiro fudud oo ku saabsan qaar ka mid ah hawlahaaga daryeelka maalinlaha ah ee caadiga ah (tusaale ahaan, cadaygailkaha, qubayso, dhar xiro).
- Ku martiqaad ilmahaaga inuu calaamadeeyo mid kasta oo ka mid ah sawirada.

Qorshaha shaqada guriga

- Wadajir u akhriya maqaal ka soo baxay wargeyska, majaladda, ama maqaal onlayn ah oo la xiriira xiisaha ilmahaaga.
- Weydii ilmahaaga inuu kuu sheego waxa ay hadda akhriyeen. Bixi jumlad bilaawayaal: Maqaalkani wuxuu ku saabsanaa..... Bixi taageerada loo baahan yahay si loo dhammaystiro jumlada.

Qorshaha wakhtiga cuntada

- Canugaaga sawir ha ka qaado cunto kasta toddobaadkan.
- Dhammaadka toddobaadka, canugaada ha sameeyo liis adigoo isticmaalaya sawirada. Ha ku qoraan magacyada iyo sharaxaadaha cuntooyinka 1-2 jumladood.

Qorshaha wakhtiga ciyaarta iyo fasaxa

- Soo hel wargeysyo ama buugaagta kuuban oo hore. Waydii canugaada inuu jarjaro sawirada waxqabadyada ay jecel yihiin inay sameeyaan.
- Waydii ilmahaaga inuu u sameeyo calaamad sawir kasta oo sharaxaad ka bixi waxay sameeyeen (tusaale ahaan, waxan waday baaskiilkayga). Ha qoraan 1-2 jumladood oo ku saabsan hawl kasta

Qorshaha banaanka

- Soo hel buug-yaraha ama warqadaha dhacdooyinka maxalliga ah ama meelaha bulshada ee la booqdo. Waxaad sidoo kale samayn kartaa buug- yar oo gaar ah oo lagu ciyaaro hawlaha (tusaale ahaan, ciyaaraha, filimada) ee gurigaaga.
- Weydii canugaada inuu dhammaystiro jumlada, "Waxaan rabaa inaan aado _____ sababtoo ah _____ " Ama waxaan rabaa inaan aado_____ sidaas darted _____ .

Qorshaha socodka, wadista baabuurka iyo baska

- Tilmaan calamadaha taraafiga ee kala duwan marka aad gaari wadato ama aad baska raacayso (tusaale ahaan, calaamada joogsiga, calaamadahaadka dhammaadka, calaamada leexasho ma leh).
- Ka wada hadla waxay calaamadaha taraafiggu ka dhigan yihiin iyo sida darawaladu u garanayaan waxa ay ula jeedaan. Ha qoraan waxay calaamaddu ka dhigan tahay.

Wakhti walba!

- Ka hel kuubano wargeysyada ama onlaynka midkood. Waydii ilmahaaga inuu ururiyo kuubannada ay u malaynayaan inay faa'iido u leeyihiin qoyskaaga.
- Kala hadal sababta ay ku xusheen kuuboonnadaas. Ha u habeeyaan kuuboonadooda qaybo kala duwan oo ha ku qoraan calaamado sida cunto, dhar, iwm.

Fikradahaaga: Markaad isku daydo qorshahan isbuucan kadib, ka jawaab su'aalahan:

Maxaa hawshan aad isbuucan isla sameyseen ilmahaaga hagaag ka ahaa?

_____

Maxaad ka baratay ilmahaaga?

_____